Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 13aad** **Muqdisho, 05 APRIL 2026** **Lr.1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# JAN-FEB

# 2026

**SHARCI LR.46** **TAARIIKH: 10-KA JANAAYO 2026**

**SHARCIGA DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA XAALADAHA MADANIGA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0801/B11/25**, ku taariikheysan **08/12/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Hindise-Sharciyeedka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
04 FEB 2026
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HON-008-2026
TAARIIKH: 05-02-2026
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA XAALADAHA MADANIGA

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA XFS

## CUTUBKA KOWAAD
## QODOBBO GUUD
### Qodobka 1aad
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 2aad
### Qeexid

Haddii aanu nuxurku macne kale u yeelin, erayada soo socda waxay yeelanayaan Sharcigan gudihiisa mid waliba macnaha ku hor qoran:

1. "**Tirakoobka Xaaladaha Madaniga**" Waxaa loola jeedaa uruurinta iyo isu-duwidda dadka, fallanqaynta iyo faafinta xogaha ku saabsan xaaladaha madaniga si waafaqsan Sharcigan.

2. "**Xog-bixiye**" Waxaa loola jeeda qofka bixinaya xogta iyo xaaladda uu waajibinaya Sharcigan in la diiwaan-geliyo.

3. "**Dan-dhawre/Mas'uulka Sharciga ah**" Waxaa loola jeedaa qofka ay maxkamad awood u leh u magacowdo maareynta nolosha, hantida iyo danaha qof kale si waafaqsan shuruucda dhaqan-galka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4. "**Diiwaan**" Waxaa loola jeedaa xogta xaaladaha madaniga iyo kuwa qoyska ee la diiwaan-geliyay si waafaqsan Sharcigan.

5. "**Diiwaan-haye Guud**" Waxaa loola jeedaa mas'uulka ugu sarreeya Agaasinka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah kaasi oo lagu magacaabo si waafaqsan Qodobka 12aad ee Sharcigan.

6. "**Dad-dhigis**" Waxaa loola jeedaa diiwaan-gelin waareysa oo waajib ah si joogta ahna loo diiwaan-gelinayo dhammaan xaaladaha madaniga ah ee dadweynaha iyadoo la raacayo shuruudaha iyo hab-raacyada Sharcigan.

7. "**Diiwaan-haye Dawladda Hoose**" Waxaa loola jeedaa mas'uulka ugu xilsaaran dawladda hoose dad-dhigista Sharcigan.

8. **"Diiwaan-haye"** Waxaa loola jeedaa sarkaal kasta ee qaabilsan hawl dad-dhigis si waafaqsan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaalkiisa.

9. **"Diiwaan-gashane"** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo xogtiisa la xiriirta dad-dhigista ay diiwaan-gashan tahay kuna kaydsan tahay diiwaanka dad-dhigista.

10. **"Xaaladaha Madaniga ah"** Waxaa loolaa jeedaa dhacdada dhalashada, dhimashada, guurka, furiinka, ilmo-korsashada ee lagu diiwaan-geliyo si waafaqsan Sharcigan.

11. **"Dhalasho"** Waxaa loola jeedaa marka ubad ka soo baxo uurka hooyadiis isagoo nool.

12. **"Dilan"** Waxaa loolaa jeedaa marka ubad uu ka soo baxo uurka hooyadii isagoo aan noolayn.

13. **"Dhimasho"** Waxaa loola jeedaa marka qof nool uu si dhammeystiran u waayo astaamaha nolosha oo dhan

14. **"Furriin"** Waxaa loola jeedaa dhammaadka heshiis guur ee u dhexeeyay nin iyo naag si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo Shuruucda kale ee Dalka.

15. **"Ilmo la helay"** Waxaa loola jeedaa ilmo la waayay labadiisa waalid iyo cid mas'uulkiisa sharciga ah oo laga helay meel cidlo ah oo ka tirsan dhulka JFS aan wax diiwaan ah ka oolin hay'adaha u xilsaaran dad-dhigista si waafaqsan sharcigan.

16. **"Guddiga"** Waxaa loola jeedaa Guddiga ku xusan Qodobka 6aad ee Sharcigan.

17. **"Guur"** Waxaa loola jeedaa heshiis dhex mara nin iyo naag kala leh xuquuq iyo waajibaad, waxaana saldhig u ah Shareecada Islaamka.

18. **"Agaasinka"** Waxaa loola jeedaa Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah ee ku xusan Qodobka 9aad ee Sharcigan.

19. **"Waalid"** Waxaa loola jeedaa hooyada iyo/ama aabbaha ilmaha dhalay.

20. **"Wakiil Diiwaan-haye"** Waxaa loola jeedaa sarkaalka ugu xilsaaran, wakiilna uga ah Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose hawlaha dad-dhigista ee tuulooyinka iyo miyiga.

21. **"Wargeliye"** Waxaa loola jeeda qofka uu Sharcigaani iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa ku waajibayaan wargelinta Diiwaan-hayaha ay khusayso xogaha la xiriira dad-dhigista.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

22. "**Wasaaradda**" Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Xukuumadda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

23. "**Wasiirka**" Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

24. "**JFS**" Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

## Qodobka 3$^{aad}$
## Ujeeddada Sharcigan

Ujeeddada Sharcigan waa;

1. Dhisidda iyo hirgelinta adeeg dad-dhigis oo midaysan, casri ah, tayadiisu sarreyso, si fududna loo heli karo kuna baahsan dalka oo idil.
2. Nidaaminta iyo daadejinta hawlaha dad-dhigista iyo bixinta shahaadooyinkooda.
3. Adkaynta kaalinta dawladaha hoose ay ku leeyihiin bixinta adeegyada dad-dhigista.
4. Yagleelidda xog-dhigga/kaydka qaran ee dhammaan diiwaanada xaaladaha madaniga ah iyo kuwa qoyska.
5. Soo-saarista warbixinnada tirakoobka xaaladaha madaniga ah oo tayadoodu sarrayso.
6. Dhisidda heykal maamul oo u xilsaaran fulinta adeegyada dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah iyo qeexidda doorarka ay kala leeyihiin.
7. Hirgelinta xarumo diiwaan-gelin oo lagu fulinayo hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah.
8. Joogtaynta tababaridda diiwaan-hayeyaalka, hawl-wadeennada iyo xirfadleyaasha fuliya hawlaha dad-dhigidda ee heer qaran, dawlad-goboleed, degmo, tuulo iyo miyiga, iyo
9. Xoojinta wada-shaqeynta hey'addaha qeybta ka ah hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 4aad

## Kaalinta Hoggaamineed ee Wasaaradda

Wasaaradda ayaa u xilsaaran siyaasad ahaan hirgelinta hawlaha dad-dhigista iyo ku baahinta dhammaan degmooyinka, tuulooyinka iyo miyiga dalka, iyadoo kaashanayso Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir.

## Qodobka 5aad

## Awoodaha Wasiirka

Wasiirku wuxuu yeelanayaa awoodaha soo socda:

1. Soo saarista xeer-nidaamiyeyaal ku saabsan bixinta adeegyada dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah kadib markuu la tashado Guddiga;
2. Magacaabidda, xil-ka-qaadista iyo shaqo ka joojinta Diiwaan-hayaha Guud ee Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah si waafaqsan Sharcigan iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka.
3. Jihaynta iyo hagidda siyaaasadeed ee arrimaha dad-dhigista iyo tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah;
4. Ansixinta hab-raacyada iyo hageyaashaa lagu fulinayo dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah marka uu soo-jeediyo Diiwaan-hayaha Guud ee Dad-dhigista.

## Qodobka 6aad

## Guddiga Qaran ee Hagidda Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga

1. Sharcigani wuxuu dhisayaa Guddiga Qaran ee Hagidda Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah oo ka koobnaanaya:

a) Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka; Guddoomiyaha Guddiga

b) Wasaaradda Caddaaladda ee heer federaal; Xubin

c) Wasaaradda Arr. Diinta iyo Awqaafta ee heer federaal; Xubin

d) Wasaaradda Arrimaha Dibadda; Xubin

e) Wasaaradda Caafimaadka ee heer federaal; Xubin

f) Wasaaradda Waxbarashada ee heer federaal; Xubin

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

g) Wasaaradda Qoyska iyo Arrimaha Xuquuqul Insaanka ee heer federaal; Xubin

h) Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda heer Federaal; Xubin

i) Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Federaalka; Xubin

j) Hay'adda Aqoonsiga & D/gelinta Dadweynaha; Xubin

k) Hay'adda Istaatiistikada Qaranka; Xubin

l) Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadda; Xubin

m) Wasaaradaha Arr. Gudaha ee Dowlad Goboleedyada; Xubin

n) Gobolka Banaadir; Xubin

o) Diiwaan-hayaha Guud ee Dad-dhigista; Xubin

**Qodobka 7aad**

**Waajibaadka Guddiga Qaran ee Hagidda Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah**

1. Guddigu wuxuu uu xilsaaran yahay:-
   a. Jiheynta iyo ka talobixinta siyaasadaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah ee Soomaaliya;
   b. Ka talo-bixinta qorsheyaasha, xeerarka iyo hab-raacyada dhaqan-gelineed ee dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah;
   c. U-qareemidda in la helo dhaqaale ku filan fulinta iyo maamulka hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah;
   d. Xaqiijinta in dhammaan hawlaha la xiriira dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah ee dalka loo maareeyo si waafaqsan Sharcigan, xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo hab-raacydiisa fulineed;
   e. Ka-doodista warbixinnada waxqabad ee Agaasinka iyo bixinta tallooyin lagu hormarinayo nidaamka dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah.

2. Guddigu wuxuu kulmaa ugu yaraan sanadkiiba hal mar, wuxuuse kulmi karaa mar kasta oo ay jirto baahi waa haddii uu sidaasi go'aamiyo guddoomiyaha Guddiga iskiis ama isagoo ku dhisaya codsiga ugu yaraan saddex meelood meel xubnaha Guddiga.

3. Iyadoo uusan ka hor imaanayn qodobbada Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa, Guddigu wuxuu degsanayaa xeer-hoosaad nidaamiya habka shaqo ee kulamadiisa iyo gudashada xilalkiisa.

## CUTUBKA LABAAD
## QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA XAALADAHA MADANIGA AH

### Qodobka 8^aad

### Qaab-dhismeedka Maamul ee Dad-dhigista iyo Tirakoobka

1. Sharcigani wuxuu dhisayaa qaab-dhismeedka maamul ee nidaamka dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah ee Qaranka Soomaaliyeed oo noqonaya sida hoose;
   a) Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah;
   b) Diiwaan-hayeyaasha Guud ee dawlad-goboleedyada;
   c) Diiwaan-hayaha Maamulka Gobolka Banaadir;
   d) Diiwaan-hayeyaasha dowladaha hoose; iyo
   e) Safaaradaha iyo qunsuliyadaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 9^aad

### Qaab-dhismeedka Agaasinka

1. Qaab-dhismeedka Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah ee JFS, waxaa uu ka kooban yahay:
   a) Diiwaan-hayaha Guud oo ah mnasuulka ugu sarreeya maamul ahaan hirgelinta iyo fulinta adeegga Dad-dhigista iyo tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah ee JFS ; iyo
   b) Waaxyo, hawl-wadeenno iyo la-taliyayaal lagama maarmaan u ah xil- gudashadiisa.

2. Iyadoo la tixgelinayo qodobbada Sharcigan, arrimaha khuseeya qaadashada, mushaarka, anshax-marinta iyo eryidda shaqaalaha waxaa lagu dhaqayaa sharciyada iyo xeerarka khuseeya ee heerka dawladeed ee ay ka shaqeeyaan.

### Qodobka 10^aad

### Shaqada Agaasinka

1. Agaasinku wuxuu u xilsaaran yahay hawlaha soo socda;

a. Yegleelidda nidaamka dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah ee dalka;

b. Hagidda iyo isu-duwidda hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha Madaniga ah ee muwaadiniinta si waafaqsan Sharcigan, xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo hab-raacyadiisa fulineed;
c. Diyaarinta diiwaannada loo adeegsanayo dad-dhigista iyo u qaybintooda dhammaan goobaha, xarumaha iyo xafiisyada fulinaya hawlaha dad-dhigista;
d. Diyaarinta iyo dhaqan-gelinta qorsheyaasha lagu hormarinayo dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah;
e. Diyaarinta barnaamijyo tababar oo kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadda diiwaan-hayeyaashaa iyo hawl-wadeennada u xilsaaran fulinta dad-dhigista;
f. Diyaarinta iyo fulinta barnaamijyo wacyi-gelineed oo ku saabsan dad-dhigista;
g. Kor-joogtaynta iyo hubinta in adeegyada dad-dhigista loo fuliyo si waafaqsan Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa;
h. Ururinta, keydinta iyo ilaalinta diiwaannada xaaladaha madaniga ah iyo kuwa qoyska;
i. Assaasidda, horumarinta, maamulidda iyo dhawridda kaydka dhexe ee diiwaannada;
j. Hirgelinta nidaam diiwaan-gelin oo danabaysan (digital);
k. Ka gacan-siinta diiwaan-hayayaasha heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir gudashada waajibaadkooda;
l. Isku xirka iyo xiriirinta diiwaan-hayeyaasha dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir;
m. Siinta dowladdaha hoose taageerada lagama maarmaanka u ah fulinta dad-dhigista oo ay ka mid yihiin, xafiisyo diiwaan-gelin oo agabkoodu u dhan yahay iyo goobo lagu kaydiyo diiwaannada;
n. Kormeeridda hawl-fulinta farsamo ee diiwaan-hayeyaasha dawladda hoose, dawlad-goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir; iyo
o. Xaqiijinta ilaalinta diiwaanka qaranka.

## Qodobka 11$^{aad}$
## Awoodaha Agaasinka

1. Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah wuxuu yeelanayaa shaabad iyo astaan u gaar ah oo lagu asteeyo warqadaha rasmiga ah ee Agaasinka.

2. Agaasinku wuxuu abuurayaa oo hirgelinayaa nidaam diiwaan-gelin danabaysan kaasi oo;
   a. Waafaqsan una hoggaasan Sharcigaan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b. Leh jiritaan waara;
c. Amaankiisa iyo sir ahaanshihiisa suggan yahay;
d. Leh halbeegyo looga hortagi karo ama lagu yarayn karo halis sababi karta khasaaro xogeed ama diiwaaneed;
e. Oggolaanaya xog-dhigga ama kaydka dhexe (database) in lagu diiwaangeliyo qofka, isla markaana ku xiro xaaladaha iyo dadka kale ee xiriirka la leh dhacdada la diiwaangelinayo;
f. Leh astaamo oggolaanaya in xogaha lala wadaagi karo hay'adaha kala duwan ee sharcigu u oggol yahay;
g. Ku habboon awoodda iyo karaanka Dalka oo aan u baahnayn xirfad ka sarraysa ama karti aan laga heli karin Dalka;
h. Fududeeya helidda xogta;
i. Sugaa lahaanshaha qaran ee dhammaan xogaha la diiwaangeliya, xogmaamulkiisuna u uku kooban yahay Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah oo keliya, iyo
j. Xilalka iyo awoodaha kale ee Sharcigan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa ay siiyaan.

## Qodobka 12aad
## Magacaabista Diiwaan-hayaha Guud

Wasiirka ayaa magacaabaya xilkana ka qaadi kara Diiwaanhayaha Guud ee Federaalka ee Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah.

## Qodobka 13aad
## Shuruudaha Diiwaan-hayaha Guud

1. Xilka Diiwaan-hayaha Guud ee Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah waxaa loo magacaabayaa qofkii buuxiya shuruudaha soo socda:
   a) In uu yahay muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, muslimna ah,
   b) In da'diisu aysan ka yareyn soddon (30) sano
   c) In uu dhimirkiisu dhanyahay;
   d) Inuu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsanyahay;
   e) Lahaadaa ugu yaraan shan sano waayo-aragnimo maamul ee khuseysa hawlaha dad-dhigista iyo xirfad u sahlaysa gudashada waajibaadkiisa;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

f) Waa in aysan maxkamad si kama dambeys ah xukun ugu ridin shantii (5) sano ee ugu dambeysay;

g) Inuu ka bedqabo cillad caafimaad darro oo u diidi karta gudashada waajibaadkiisa.

**Qodobka 14aad**

**Xil-waayidda Diiwaan-hayaha Guud**

1. Xilka Diiwaan-hayaha Guud wuxuu ku bannaanaan ama waayi karaa sababaha soo socda:
   a) Xil ka tegid;
   b) Geeri;
   c) Xil ka qaadis waafaqsan Sharcigan;
   d) Xaalad caafimaad oo sababta xilgudasho la'aan;
   e) Karti la'aan iyo shaqo-xumo ku saabsan xilgudashadiisa; ama
   f) Been ka sheeggid shuruudaha u qalmidda magacaabista si waafaqsan Qodobka 13aad ee sharcigan.

**Qodobka 15aad**

**Xilka iyo Awoodaha Diiwaan-hayaha Guud**

1. Diiwaan-hayaha Guud waa sarkaalka maamul ahaan ugu sarreeya Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah, wuxuuna u xilsaaran yahay;
   a) Hagidda iyo isku-duwidda hawlaha dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ee uu Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah u xilsaaran yahay;
   b) Maamulidda hawl-wadeenada iyo shaqaalaha si waafaqsan sharuucda khuseeya;
   c) Diinwaanhayaha guud ee Federalka wuxuu diinwaangelinayaa diinwaangeliyaasha Dowladda Goboleedyada, Gobolka Banaadir iyo dowladaha hoose;
   d) Metelaadda Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah;
   e) Diyaarinta warbixinnada Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah iyo u gudbintooda Wasaaradda iyo Guddiga.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

## Qodobka 16aad

## Diiwaan-hayaha Dawlad-goboleedyada iyo Gobolka Banaadir

1. Wasiirka Arrimaha Gudaha ee heer dawlad-goboleed ayaa magacaabaya, xilkana ka qaadaya, kuna samayn kara shaqo ka joojin Diiwaan-hayaha heer dawlad-goboleed iyadoo lagu salaynayo shuruudaha magacaabista, sababaha xilka qaadista iyo shaqo ka joojinta ee ku xusan Qodobada 12aad, 13aad iyo 14aad ee Sharcigan.

2. Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ayaa magacaabaya, xilkana ka qaadaya, kuna samaynaya shaqo ka joojin Diiwaan-hayaha Gobolka Banaadir iyadoo lagu salaynayo shuruudaha magacaabista, sababaha xilka qaadista iyo shaqo ka joojinta ee ku xusan Qodobada 12aad, 13aad iyo 14aad ee Sharcigan.

3. Diiwaanhayaha dawlad-goboleedka iyo Gobolka Banaadir waxay u xilsaaran yihiin:
   a) Hagidda iyo isku-duwidda hawlaha dad-dhigista ee heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir;
   b) Maamulidda shaqaalaha si waafaqsan sharuucda khuseeya;
   c) Iskuxirka xarumaha diiwaan-gelinta ee heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir ee hoos yimaada;
   d) Fududeynta tababarrada iyo barnaamijyada kor loogu qaadayo aqoonta iyo xirfadaha diiwaan-hayayaasha heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir ee hoos yimaada; iyo
   e) In uu xaqiijiyo in dad-dhigista heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir ay u dhacdo si waafaqsan Sharcigaan iyo xeerarka kale ee khuseeya.

## Qodobka 17aad

## Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose

1. Guddoomiye degmada ayaa magacaabaya, xilkana ka qaadaya, kuna samayn kara shaqo ka joojin Diiwaan-hayaha dawladda hoose iyadoo lagu salaynayo shuruudaha magacaabista, sababaha xil-ka-qaadista iyo shaqo ka joojinta ee ku xusan Qodobada 12aad, 13aad iyo 14aad ee Sharcigan.

2. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose ee la magacaabay wuxuu hawlgalayaa marka uu Diiwaanhayaha Dowlad Goboleedyada ama Diiwaanhayaha Gobolka Banaadir uu usoo gudbiyo Diiwaanhayaha Guud si uu u diiwaan-geliyo saxiixa iyo shaabadda dowladda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

hoose ee lagu suntayo diiwaanka xaaladaha madaniga ah iyo shahaadooyinkooda si waafaqsan Sharcigan.

3. Diiwaan-hayaha dawladd a hoose wuxuu u xilsaaran yahay: -
   a) Qabashada codsiyada iyo xaqiijinta xogaha iyo cadeymaha ku qoran shaxda (foomamka) dad-dhigista sida sharcigani farayo.
   b) Diiwaan-gelinta xogaha la xiriira xaaladaha madaniga ah iyo kuwa qoyska;
   c) Bixinta shahaadooyinka, caddaymaha ama xaanshiyaha aqoonsiga ee xogaha laga diiwaan-geliyay Xaaladaha kala ah:
      i. dhalashada;
      ii. dhimashada,
      iii. guurka;
      iv. furiinka;
      v. ilmo-korsiga; iyo
      vi. diiwaanka qoyska;
   d) Xaqiijinta in dhammaan dadku leeyihiin xuquuq siman ee diiwaan-gelinta si ay u helaan waraaqaha aqoonsi gaarka ah ee ay xaqa u leeyihiin; iyo
   e) Siinta diiwaan-gashanaha nuqul diiwaankiisa haddii uu codsado.

**Qodobka 18aad**

**Awoodaha Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose**

1. Diiwaan-hayaha dawladda hoose wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:
   a) Xaqiijinta iyo sugidda sax ahaanshiyaha xaaladda la diiwaan-gelinayo;
   b) Sixidda xogaha la diiwaan-geliyay, shahaadooyinka iyo caddaymaha la bixiyay si waafaqsan Sharcigaan iyo xeer-nidaamiyayaashiisa;
   c) Wax-ka-bedelidda diiwaannada si waafaqsan Sharcigaan, xeer-nidaamiyeyaalkiisa iyo habraacyadiisa.

2. Diiwaan-hayaha dawladda hoose wuxuu magacaabi karaa, xilkana ka qaadi karaa Wakiil Diiwaan-hayaha Dowladda Hoose oo fulinayaa hawlaha uu u igmado ee la xiriira xilkiisa iyo awoodihiisa.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 19aad
## Diiwaan-hayayaasha Dawladda Hoose ee Gobolka Banaadir

Degmo kasta ee Gobolka Banaadir waxa ay yeelanaysaa diiwaanhaye la awood ah Diiwaanhayaha dawladaha hoose ee degmooyinka kale ee Dalka, kuna yimaada hab la mid sida ku cad Faqradda 1aad ee Qodobka 17aad ee Sharcigan, wuxuuna leeyahay awoodaha ku xusan Qodobka 18aad ee Sharcigan.

## CUTUBKA SADDEXAAD
## HABRAACA GUUD EE DAD-DHIGISTA
## Qodobka 20aad
## Habraaca Guud ee Dad-dhigista

1. Xog-bixiye kasta waxaa waajib ku ah inuu bixiyo xogaha la xiriira dad-dhigidda ee la diiwaan-gelinayo si waafaqsan Sharcigan.

2. Xogta xaaladaha madaniga ah waa in lagu dhigaa shaxda (form) loo asteeyay in lagu diiwaan-geliyo, xog-bixiyuhuna uu saxiixaa ama muunadda suulkiisa ku suntaa shaxda la buuxiyay.

3. Xaaladaha madaniga ah waxaa lagu diiwaan-gelinayaa muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood oo ka billaabmaysa taariikhda ay dhacday marka laga reebo dhacdada dhalashada oo ay tahay in lagu diiwaangeliyo muddo sanad gudihiisa ah.

4. Dhacdo kasta oo aan lagu diiwaan-gelin muddada uu Sharcigaan u asteeyay waxaa loo tixgelinayaa diiwaan-gelin daahday, waxaana ku waajibaya qofka ay khuseyso ama xog-bixiyaha inuu la yimaado cudur-daar maan-gal ah ama uu bixiyo ganaax maaliyadeed oo uu Wasiirku ku soo saaro xeer-nidaamiye.

5. Diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah ee ka dhex dhaca maraakiibta iyo diyaaradaha ay leedahay ama ka diiwaan-gashan JFS, waxaa loo raacayaa habraaca uu Wasiirku ku soo saaro xeer-nidaamiye.

6. Diiwaan kasta oo aan la isticmaalin cillad darteed ama la saxay xogta ku qoran oo markii hore si qalad loo geliyay si waafaqsan Qodobka 21aad ee Sharcigan, Diiwaan-hayaha waxaa waajib ku ah in uu dusha dambe uga sunto labo xariiq oo is dhaafsan kuna dhufto shaabbad ay ku qoran tahay “ANSAX MA AHA”.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

7. Diiwaan-gelinta xaaladda madaniga ahi waa mid lacag la'aan ah.

8. Shahaadooyinka lagu bixiyo caddaynta dhacdo muhiim ah iyo qoyska waa abadi aanan lahayn dhamaad ama dhicid.

9. Dhammaan khidmadaha ama lacag bixinta shahaadooyinka iyo ca ddaymaha ku sheeggan Sharcigan waxaa lagu jaan-goynayaa xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka ka dib marka uu wada-tashi la sameeyo Guddiga.

10. Diiwaan-hayaha ayaa mas'uul ka ah sugnaanshiyaha xogaha la diiwaan-gelinayo.

## Qodobka 21aad
## Habraaca Sixidda iyo Bedelidda Diiwaannada

1. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose isagoo ku salaynaya codsiga cidda ay khuseyso, wuxuu sixi karaa qaladaadka qoraal ee yaryar ee ku jira Diiwaanka haddii aysan sixiddaasi saamayn ku yeelanayn nuxurka xogaha ku dhigan diiwaanka ama shahaadada.

2. Marka laga reebo sixidda qaladaadka qoraal ee yaryar, diiwaanhayuhu ma samayn karo sixitaan saamayn ku yeelanaya nuxurka xogaha la diiwaan-geliyay isaga oo aanan helin amar garsoor oo ka soo baxay maxkamad awood u leh.

3. Codsiga ku saabsan sixidda ama beddelid Diiwaan waxaa maxkamadda ka codsan kara Diiwaan-gashanaha ay khusayso ama Dan-dhawrihiisa.

4. Maxkamaddu, marka ay ka baaran-degto codsiga loo soo gudbiyay, waxay go'aamin kartaa in Diiwaanka lagu sameeyo sixid ama mid cusub uu sameeyo Diiwaan-hayaha.

5. Diiwaan-hayuhu wuxuu la wadaagayaa sixitaanka ama bedelaadda la sameeyay iyo amarka maxkamadda ee lagu saleeyay dhammaan hay'adaha horay u haystay nuqulka Diiwaanka ee lagu sameeyay sixitaan ama beddelaad.

6. Marka la saxo ama la beddelo Diiwaanka, Diiwaan-hayuhu wuxuu siinayaa Diiwaan-gashanaha shahaado cusub.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 22aad
## Reebbid

1. Si waafaqsan Sharcigan, dhammaan hay'adaha dawladeed ee heer federaal, heer dawlad-goboleed iyo Maamulka Gobolka Banaadir ee aan Sharcigaan loogu xilsaarin ururinta, diiwaan-gelinta iyo kaydinta xogaha la xiriira xaaladaha madaniga, waxaa ka reebban in ay sameeyaan ururin, diiwaan-gelin ama kaydin kasta oo khusaysa xaaladaha madaniga ah.

2. Sugnaanshiyaha dhacdo muhiim ah iyo diiwaanka qoyska waxaa lagu caddayn karaa oo keliya shahaado lagu bixiyay si waafaqsan Sharcigaan.

# CUTUBKA AFARAAD
# DIIWAAN-GELINTA XAALADAHA MADANIGA AH IYO QOYSKA
## Qodobka 23aad
## Diiwaan-gelinta Dhalashada

1. Diiwaan-gelinta ubad kasta oo ku dhasha JFS waa mid waajib ah oo lacag la'aan ah.

2. Ubad kasta waxaa dhalashadiisa laga diiwaan-gelinayaa degmada ama goobta ugu dhow ee xarunta dad-dhigista ay ku taallo.

3. Diiwaan-hayaha waxaa waajib ku ah inuu siiyo waalidka ama dan-dhawraha ubadka shahaado dhalasho marka laga codsado.

## Qodobka 24aad
## Waajibka Wargelinta Dhalashada Ubadka

1. Dhalashada ubadka waa in lagu wargeliyaa Diiwaan-hayaha sida ugu dhaqsiyaha badan si loo diiwaangeliyo

2. Waajibka wargelinta Diiwaan-hayaha iyo sugidda dhacdada dhalashada waxay saaran yihiin:
   a) Waalidka ilmaha;
   b) Maamulka xarunta caafimaad ee ubadku ku dhashay;
   c) Umuliso diiwaan-gashan;

d) Hawl-wadeennada caafimaad ee fuliya hawlaha talaalka ubadka haddii ay xaqiijiyaan in dhalashada ubadka aanan la diiwaan-gelinin; ama
e) Cid kasta oo kale haddii uusan ubadku ku dhalanin xarun caafimaad si waafaqsan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

3. Haddii mid ka mid ah kuwa uu saaran yahay waajib wargelinta uu gaarsiiyo Diiwaan-hayaha dhacdada dhalashada waxay ka ridaysaa dhammaan cid kasta oo kale oo ay saarnayd waajibka wargelinta.

## Qodobka 25aad
## Xogta Dhalashada ee La Diiwaan-gelinayo

1. Qof kasta oo ku dhashay dhulka JFS, oo diiwaan-hayuhu diiwaanka dhalashada uu geliyay waa in ugu yaraan laga diiwaan-geliyaa xogaha hoose:
   a) Ubadka magaciisa, nooca jinsigiisa ee lab ama dheddig, goobta iyo taariikhda dhalashadiisa;
   b) Magacyada (nationality); waalidkiisa oo dhammaystiran iyo dhalashadooda
   c) Cinwaanka deegaanka ee Waalidka;
   d) Goobta iyo taariikhda la diiwaan-geliyay; iyo
   e) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaan-gelinta dhalashada kuwaas oo uu Wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

2. Diiwaan-hayaha waxaa ka reebban inuu xog-bixiyaha waydiiyo ama diiwaan-geliyo xog aan lagu sheeggin Sharcigan, xeer-nidaamiyeyaalkiisa ama hab-raacyadiisa.

3. Diiwaan-hayuhu waa in uu siiyaa waalidka ama dan-dhawraha shahaadada dhalashada ilmaha muddo toban (10) maalin shaqo gudahood marka laga codsado.

4. Shahaadada dhalashada laguma qori karo arrimo muujinaya hayb-sooc ama takoor.

5. Haddii waalidnimada ubadka muran ku jiro; Diiwaan-hayaha waxaa ka reebban inuu diiwaan-geliyo dhalashada ubadka illaa uu helo xukun maxkamadeed oo kama dambaysa ah oo lagu suggay waalidka ubadka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Qodobka 26aad**
**Waqtiga Diiwaan-gelinta Dhalashada**

1. Dhalashada ubadka waa in lagu diiwaan-geliyo muddo sanad gudihiisa oo ka bilaabata taariikhda dhalashada ubadka.

2. Muddada diiwaan-gelinta dhalashada ubadka ee uu muran ku jiro waalidkiisa, waxay ka billaabmaysaa taariikhda uu soo baxo xukunka kama dambaysta ah ee maxkamadda kaasi oo lagu caddeeyay waalidkiisa dhalay ubadka.

3. Ubadka leh hooyo keliya kaasi ee aan la garanayn ama aan la caddayn aabbihiis waxaa loo diiwaan-gelinayaa magaca dhammaystiran oo ay hooyadii siiso.

**Qodobka 27aad**
**Diiwaan-gelinta Daahda ee Dhalashada Ubadka**

1. Ubadka dhalashadiisa ay ka soo wareegatay muddo ka badan sanad isagoo oo aanan la diiwangelin, waxaa loo qaadanayaa in diiwaan-gelinta dhalashadiisu daahday.

2. Diiwaan-gelinta dhalashada ubadka ee daahday waa in la diiwaangeliyaa marka uu xog-bixiyuhu ama wargeliyuhu siiyo Diiwaan-hayaha xogo ku filan iyo caddaymo ku saabsan dhalashadiisa si waafaqsan Sharcigan.

3. Diiwaan-hayuhu waa inuu siiyaa waalidka ama Mas'uulka Sharciga shahaadada dhalashada ilmaha muddo toban (10) maalin shaqo gudahood marka laga codsado.

**Qodobka 28aad**
**Diiwaan-gelinta Ilmo La Helo**

1. Qofka ama hay'adda hesha ilmo waa in ay ku wargelisaa kuna wareejisaa ilmaha la helay, dharkiisa iyo allaab kasta oo lala helay hay'adda dawladeed ay khuseyso ama saldhigga booliska ee ugu dhow ugu badnaan 24 saac gudahood oo ka billaabanaysa marka la helay.

2. Maamulka hay'adda dowladeed ama taliska saldhigga booliska waa inuu ka qoraa qofka ilmaha helay caddayn dhammaystiran kana saxiixaa kadibna u gudbiyaa warbixintaasi, cidda heshay ilmaha iyo ilmaha qudhooda maxkamadda awoodda u leh.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

3. Maxkamaddu waa in ay qaado tallaab kasta oo maangal ah oo lagu aqoonsan karo ubadka la helay laguna ogaan karo waalidka iyo da'da ilmaha le helay.

4. Maxkamaddu markay dhagaysto arrinka ilmaha ku saabsan kuna qanacdo in ilmaha la helay uusan lahayn waalid ama cid mas'uul sharci ka ah waxay soo saaraysaa amar maxkamad oo lagu caddaynayo arrimaha soo socda:
   a) Magaca ay maxkamadu siiso ilmaha la helay;
   b) Labnimadiisa ama dhedignimadiisa;
   c) Inta lagu qiyaasay da'diisa;
   d) Goobta iyo taariikhda la helay;
   e) Goobta iyo taariikhda la diiwaangeliyay; iyo
   f) Cidda heshay

5. Maxkamaddu waxay amarkeeda u gudbinaysaa Diiwaan-hayaha ay khusayso si uu u diiwaan-geliyo isagoo raacaya shaxda loo diyaariyay diiwaan-gelinta ilmaha la helay ee Wasiirku ku soo saaro xeer-nidaamiye.

## Qodobka 29[aad]
## Diiwaan-gelinta Ilmo-korsashada

1. Ilmo kasta oo lagu korsado si waafaqsan sharciga JFS, waa in la diiwaan-galiyo.

2. Maxkamada awoodda u lihi waa in ay u gudbisaa Diiwaan-hayaha nuqulka go'aanka ansixinta korsashada ubad muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood ah marka ay ansixiso ilmo-korsashada

3. Diiwaan-hayaha waa inuu diiwaangeliyaa ugu yaraan xogaha soo socda si loo diiwaangeliyo dhacdada ilmo-korsashada:
   a) Ubadka magaciisa, nooca jinsigiisa ee lab ama dheddig, goobta iyo taariikhda dhalashadiisa;
   b) Magacyada cidda korsanaysa ilmaha oo dhammaystiran;
   c) Cinwaanka deegaanka ee korsadaha/korsadayaasha;
   d) Goobta iyo taariikhda la diiwaan-geliyay; iyo
   e) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaan-gelinta ilmo-korsashada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 30aad
## Diiwaan-gelinta Guurka

1. Guurka ka dhaca gudaha dalka JFS si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo shuruucda dhaqan-galka ah waa in la diiwaan-geliyaa muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood

2. Waajibka wargelinta Diiwaan-hayaha ee ku saabsan dhicidda guurka waxay saaran tahay cidda fulisay si waafaqsan shuruucda dalka.

3. Haddii mid ka mid ah kuwa uu saaran yahay waajibka wargelinta uu gaarsiiyo Diiwaan-hayaha dhacdada guurka waxay ka ridaysaa dhammaan cid kasta oo kale oo ay saarnayd waajibka wargelinta.

4. Xogaha soo socda ayaa lagu diiwaan-gelinayaa diiwaanka guurka:
   a) Magacyada lamaanaha is guursaday;
   b) Goobta iyo taariikhda dhalashada lamaanaha;
   c) Wadanka ay u dhasheen lamaanuhu
   d) Goobta iyo taariikhda guurku dhacay;
   e) Goobta iyo taariikhda la diiwaangeliyay;
   f) Magacyada waalidiinta lammaanaha is guursanaya;
   g) Meesha ay deggan yihiin lamaanaha is guursanaya;
   h) Qofka isku mehriyay lammaanaha;
   i) Magacyada iyo degaannada markhaatiyada; iyo
   j) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaan guurka kuwaas oo uu Wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

5. Diiwaan-hayaha waa inuu 10 maalin shaqo gudahood ku siiyaa lamaanaha mid walba shahaadada guurka kadib bixinta khidmada ama lacagta loo qoondeeyay.

## Qodobka 31aad
## Diiwaan-gelinta Furriinka

1. Furiinka oo ku yimaada rabitaanka lamaanaha is qaba ama amar garsoor oo lagu dhammaynayo guur si sharci ku xirmay ama shuruudaha guurka aan dhammaystirnayn waa in lagu wargeliyaa Diiwaan-hayaha muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood si loogu qoro diiwaanka furiinka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

2. Wargelinta Diiwaan-hayaha waxay waajib ku tahay lammaanaha is furay ama garsooraha soo saaray amarka lagu dhammaynayo guurka.

3. Haddii mid ka mid ah kuwa uu saaran yahay waajibka wargelinta uu gaarsiiyo Diiwaan-haya dhacdada furriinka waxay ka ridaysaa dhammaan cid kasta oo kale oo ay saarnayd waajibka wargelinta.

4. Diiwaan-hayuhu waa inuu ku qoraa diiwaanka furriinka xogaha soo socda:
   a) Cinwaanka deegaanka ee lamaanaha is furay;
   b) Wadanka ay u dhasheen lamaanaha is furay;
   c) Taariikhda iyo goobta uu furiinku ka dhacay;
   d) Goobta iyo taariikhda la diiwaan-geliyay;
   e) Tixraaca amarka maxkamadeed ee lagu go'aamiyay furiinka; iyo
   f) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaanka furiinka kuwaas oo uu Wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

5. Diiwaan-hayaha waa in uu 10 (toban) maalin shaqo gudahooda ku siiyaa lamaanaha mid walba shahaadada furriinka ka dib bixinta khidmada ama lacagta loo qoondeeyay.

## Qodobka 32aad
## Diiwaan-gelinta Degenaanshaha Qoyska iyo Qofka

1. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose wuxuu diiwaan-gelinayaa qoys iyo qof kasta ee deggan degmada.

2. Diiwaanka qoyska ee deggan degmada waxaa lagu muujinayaa xogaha hoose ee soo socda:
   a) Magaca dhamaystiran ee aabbaha qoyska oo ah madax qoyska;
   b) Magaca dhamaystiran ee hooyada qoyska;
   c) Magacyada caruurta ay dhaleen aabbaha iyo hooyada; iyo
   d) Magacyada dhamaystiran ee qof kasta oo kale oo la deggan kana tirsan qoyska.

3. Mas'uulka qoyska wuxuu noqon karaa hal qof oo keligiis meel deggan, hooyo carmal ah ama aabbe aan xaas lahayn oo caruur haysta.

4. Haddii madaxa qoysku leeyahay in ka badan hal xaas; qoys kasta waxaa loo diiwaan-gelinayaa si gaar ah haddii aysan ku wada noolayn hal guri.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

5. Qof kasta ee mas'uul ka ah qoys waa in uu ku wargaliyaa Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose 10 (toban) cisho gudahood isbeddel kasta oo ku dhaca xogaha ka diiwaan-gashan qoyskiisa sida xaaladaha dhalashada, guurka, furiinka, baabi'inta and fasakhida guurka, dhimashada, u guuridda degmo kale, miyi ama dalka dibeddiisa.

6. Qof ama qoys kasta ee u guuraya deegaan kale oo ka tirsan isla degmada laga diiwaan-geliyay ama degmo ka duwan tii uu deganaa wuxuu ogeysiinayaa Diiwaan-hayaha dowladda hoose.

7. Diiwaan-hayaha dawladda hoose, marka uu helo ogeysiinta ku xusan faqradda kore, waa in uu cusboonaysiiyaa cinwaanka qoyska iyo qofka haddii uu qofku u guuray haddii ay tahay isla degmada. Haddii uu qoysku iyo qofku u guuray deegaan ka tirsan degmo kale; Diiwaan-hayaha dawladda hoose wuxuu nuqul xogtiisa ah u wareejinayaa Diiwaan-hayaha dawladda hoose ee uu qofku ama qoysku u guuray.

8. Diiwaan-hayaha dawladda hoose waa inuu siiyaa caddeyn degenaanshaha degmada, qof kasta oo lagu diiwaan-geliyay si waafaqsan Sharcigan iyo xeer- nidaamiyeyaashiisa.

9. Xogaha laga diiwaan-gelinayo qoyska iyo qofka waxaa lagu faahfaahinayaa xeer- nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

## Qodobka 33$^{aad}$
## Buugga Qoyska

1. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose wuxuu qoys walba u samaynayaa diiwaan ama buug gaar u ah waalidka iyo ubadkiisa.

2. Buugga qoysku waxaa lagu kaydinayaa xogta waalidka iyo ubadkiisa, waxaana nuqul laga siinayaa marka waalidku codsadaan.

3. Maamulka, xannaanaynta iyo dhowridda buugga qoyska waxaa u xilsaaran Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 34aad

## Diiwaan-gelinta Dhimashada

1. Dhimasha kasta oo ka dhex dhacda Dalka gudihiisa ama dibaddiisa khusaysana muwaadin Soomaaliyeed waa in la diiwaangeliyaa.

2. Waajibka wargelinta Diiwaan-hayaha iyo sugidda dhacdada dhimashada waxay saaran yihiin:
   a) Maamulka xarumaha caafimaad ee qofku ku dhintay;
   b) Maamulka qabuuraha lagu aasay; ama
   c) Cid kasta oo kale ee og dhimashada sida lagu faahfaahiyo xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka.

3. Haddii mid ka mid ah kuwa uu saaran yahay waajib wargelinta uu gaarsiiyo Diiwaan-hayaha dhacdada dhimashada waxay ka ridaysaa dhammaan cid kasta oo kale oo ay saarnayd waajibka wargelinta.

4. Duugista qofka dhintay waa in loo haystaa fasax xabaal kaasi oo lagu bixinayo si waafaqsan xeer-nidaamiye lagu fulinayo Sharcigan.

5. Diiwaan-gelinta dhimashada xubnaha ciidamada qalabka sida ee ku geeriyooda iyagoo shaqo ku jira ama xaalad dagaal waxaa u xilsaaran Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah ama cidda uu igmado si waafaqsan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

6. Diiwaanhayaha Guud wuxuu u magacaabi karaa diiwaanhaye gaar ah oo u xilsaarnaanaya diiwaan-gelinta geeri wadareed ay sababtay musiibo si waafaqsan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

## Qodobka 35aad

## Xogta Diiwaanka Dhimashada

1. Xogaha soo socda waxaa lagu qorayaa Diiwaanka Dhimashada:
   a) Magaca qofka dhintay oo dhammaystiran iyo da'diisa;
   b) Labnimada ama dhedignimada qofka dhintay;
   c) Shaqadiisa;
   d) Cinwaanka deegaankiisa;
   e) Goobta iyo taariikhda dhimashada;
   f) Goobta iyo taariikhda la diiwaan-geliyay;
   g) Tixraaca caddaynta sababta dhimashada; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

h) Xogaha kale ee ku cad shaxda diiwaanka dhimashada kuwaas oo uu Wasiirku ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

## Qodobka 36aad
## Diiwaan-gelinta Geerida Aan La Hubin

1. Maxkamadda awoodda u leh ayaa go'aaminaysaa jiritaanka geerida aan la hubin si waafaqsan shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxayna u gudbinaysaa Diiwaan-hayaha ay awood ahaan khuseyso si uu u diiwaan-geliyo.

2. Qofka loo diiwaan-geliyay geeri aan la hubin waxaa diiwaanka looga saarayaa oo kaliya amar garsoor oo ka soo baxay maxkamad awood u leh kaasi oo baabi'inaya go'aankii lagu gaaray jiritaanka geerida aan la hubin.

## Qodobka 37aad
## Diiwaan-gelinta Dhicisyada

1. Dhakhaatiirta caafimaadka ayaa bixisa shahaadada dhimashada dhiciska, waana in diiwaan-hayuhu diiwaangeliyo

2. Diiwaan-gelinta xogaha dhimashada dhiciska waxaa intii ka khuseysa loo raacayaa si waafaqsan Qodobka 34aad ee Sharcigan.

3. Diiwaanhayuhu waa in uu ku keydiyaa diiwaan u gaar ah xogta dhimashada dhicisyada la diiwaan-geliyo.

# CUTUBKA SHANAAD
# MAARAYNTA DIIWAANNADA DAD-DHIGISTA IYO TIRAKOOBKA
## Qodobka 38aad
## Mabaadi' Guud

1. Diiwaannada waa in ay ku jiraan dhammaan xogaha dad-dhigista ee Sharcigani faray in la diiwaan-geliyo.

2. Dhacdo kasta ee muhiim ah waa in aan la diiwaan-gelin wax ka badan hal mar.

3. Dhacdo kasta ee muhiim ah ee la diiwaan-gelinayo waa in ay yeelataa diiwaan u gaar ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

4. Diiwaanka qoyska wuxuu noqonayaa mid gaar ah.

5. Diiwaan-haye kasta ee ka mas'uul ah dad-dhigis waa in uu ilaaliyaa xogta diiwaanka ku jirta, waxaana ka reebban inuu siiyo ama la wadaago cid uusan sharcigu u oggolayn.

## Qodobka 39aad
## Wareejin Nuqullada Diiwaannada

1. Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose ee diiwaan-geliya dhacdo muhiim ah iyo qoyska waa in uu nuqul diiwaannadaasi iyo caddaymaha la xiriira u gudbiyaa Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood marka uu diiwaan-geliyo.

2. Agaasinku marka uu helo nuqullada diiwaannada ee faqradaha hore ku xusan, waa inuu u habeyaa xogaha, abla-ablayaa, oo uu keydiyaa nuqullada diiwaannada kama dambaysta ah.

## Qodobka 40aad
## Warbixinta iyo Tirakoobyada Xaaladaha Madaniga ah

1. Diiwaan-hayaha Guud wuxuu dhisayaa guddi farsamo oo ka kooban:
   a) Saddax xubnood oo ka imaanaya Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah; iyo
   b) min hal xubin oo ka kala socda xafiisyada diiwaan-hayayaasha dawlad-goboleedyada, Maamulka Gobolka Banaadir, Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyo Wasaaradaha Caafimaadka ee labada heer.

2. Guddiga farsamo wuxuu diyaarinayaa warbixinta tirakoobka xaaladaha madaniga ah si waafaqsan shuruucda dalka iyo halbeegyada caalamiga ah, una gudbinayaa Diiwaan-hayaha Guud.

3. Diiwaan-hayaha Guud ayaa u xilsaaran u gudbinta nuqul rasmi ah ee warbixinta tirakoobka xaaladaha madaniga ah Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyo Guddiga.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 41aad
## Habka Dad-Dhigista ee Dalka Dibaddiisa

1. Muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku nool dalka dibaddiisa waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan adeeg dad-dhigis iyadoo loo diiwaan-gelinayo xaaladaha madaniga ah ee la soo gudboonaada.

2. Safaaradaha ama meesha aysan safaarad jirin, qunsuliyada Soomaaliya ee ku taala dalka uu joogo qofka muwaaddinka ah ee doonaya diiwaan-gelinta, ayaa ka mas'uul ah dad-dhigista.

3. Haddii meesha uu muwaaddinka Soomaaliyeed joogo aysan ka jirin safaarad Soomaaliyeed ama qunsuliyad, waxaa adeegga dad-dhigista bixinaya safaaradda ama qunsuliyadda ugu dhow degaanka muwaaddinka, ama safaaradda ama qunsuliyadda loo xilsaaro degaanka muwaaddinkaas.

4. Safaaradda ama qunsuliyadda u xilsaaran dad-dhigista ee ku xusan faqradaha (2), iyo (3) ee qodobkan, waxa ay:
   a) Qabanayaan dhammaan codsiyada iyo cadeymaha la xiriira diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah ee muwaaddinka;
   b) Hubinayaan saxnaanshaha caddeymaha ay keenaan muwaaddiniinta codsanaya diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah kadibna waxa ay siinayaan xaqiijin sugnaantooda;
   c) Codsadaha ka buuxinayaan foomka xogta dhacdada la diiwaan-gelinayo kadibna waxa ay hubinayaan dhamaystirnaanta xogta la diiwaan-geliyay iyo saxnaashaheeda kadibna saxiixayaan oo shaabadaynayaan foomka;
   d) Muddo aan ka badnayn 21 (labaatan iyo kow cisho) gudahood marka ay qabtaan wargelinnada soo gaarsiinayaan Agaasinka Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah, foomka ku xusan xarafka (c) iyo dhammaan caddaymaha lagama maarmaanka ah si waafaqsan sharciyada khuseeya dad-dhigista ee dalka muwaaddinku deggan yahay.

5. Agaasinku, marka uu soo gaaro foomka iyo caddaymaha ku xusan faqradda hore, wuxuu diiwaan-gelinayaa dhacdada una soo saarayaa muwaaddinka ay khusayso warqadaha iyo shahaadooyinka haddii uu sidaasi codsado muwaaddinku.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 42aad
## Ilaalinta Xogta

1. Dhammaan xogaha lagu diiwaan-geliyay si waafaqsan Sharcigan waa inay dhawrsan yihiin.

2. Waxaa reebban in la ururiyo, diiwaan-geliyo ama la kaydiyo xog aan lagu sheeggin Sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa.

3. Waxaa reebban in xogta la diiwaan-geliyay loo adeegsado ujeedo ka duwan midda uu tilmaamayo Sharcigani ama sharci kale ee dhaqan-gal ka ah Dalka;

4. Xogaha Diiwaan-gashan waa in la ilaaliyaa lana sugaa amnigooda si aysan u lumin, burburin, ugu gacan gelin cid aan xaq u lahayn ama aan fasax u haysan, ama loo adeegsado si aan waafaqsanayn Sharciga.

# CUTUBKA LIXAAD
# QODOBO GUNAANAD AH
## Qodobka 43aad
## Diiwaan-gelinta Xaaladaha Ka Horreeyay Dhaqan-galka Sharcigan

1. Dhammaan xaaladaha khuseeya dad-dhigista ee dhacay ka hor dhaqangalka Sharcigan waa in la diiwaan-geliyaa si waafaqsan Sharcigaan, waana in lagu dhamaystiraa muddo aan ka badnayn toban (10) sano gudahood oo ka billaabmaysa marka Sharcigani dhaqangalo.

2. Diiwaan-gelinta faqradda hore ku xusan ee dadka deggan dalka dibaddiisa waxaa loo fulinayaa si waafaqsan habraaca diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah ee muwaadiniinta ku nool dalka dibaddiisa ee ku xusan Qodobka 41aad ee Sharcigaan.

3. Wasiirka wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye si gaar ah u nidaaminaya fulinta diiwaan-gelinta ku sheeggan qodobkaan.

## Qodobka 44aad
## Wadashaqaynta Hay'adaha Shaqada Ku Leh Diiwaan-gelinta

1. Wasaaradda waxay xiriir wada-shaqeyn iyo iskaashi la yeelanaysaa wasaaraddaha iyo hey'adaha heer federaal ee qeybta ka ah fulinta dad-dhigista.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2. Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dawlad-goboleedyada waxay xiriir wada-shaqayn iyo iskaashi la yeelanayaan wasaaraddaha iyo hey'adaha ee heer dawlad-goboleed ah kuwaas oo qeyb ka ah fulinta dad-dhigista.

## Qodobka 45aad
## Lumid, Baabi'id iyo Kharribmid Diiwaanka Dad-dhigista

1. Diiwaan-haye kasta ee Dawladaha Hoose waa in uu diyaariyaa nuqul daabacan ee ah Diiwaanka uu u gudbiyay Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah.

2. Haddii diiwaanka dad-dhigistu uu lumo, tirtirmo, hallaabo (kharaabo) ama dhaawac gaaray sababo in si cad xogtiisa loo arki waayo, waa in diiwaan-hayaha mas'uulka ka ah uu sameeyaa diiwaan kale ah oo uu ku rogayo macluumaadkii ku jiray kii hore isagoo ka tixraacaya wixii diiwaankii hore ka haray iyo xogta foomamka uu hayo.

3. Diiwaanhayuhu waa in uu ku wargeliyaa Agaasinka Adeegyada Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga ah iyo Diiwaan-hayaha dawlad-goboleedka ee uu hoos yimaado si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 46aad
## Dambiyada iyo Ciqaabaha

1. Wargeliye kasta oo aanan wargelin jiritaanka dhacdo muhiim ah hay'adaha u xilsaaran diiwaan-gelintooda si waafaqsan Sharcigan wuxuu galayaa dambi ciqaabtiisu tahay ganaax lacageed aan ka badnayn USD $100 (boqol) doolarka Maraykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

2. Xog-bixiye kasta oo been ka sheegga ama qariya xog la xiriirta dhacdo muhiim ah ama diiwaanka qoyska si loo diiwaan-geliyo wuxuu galayaa dambi ciqaabtiisu tahay xabsi u dhaxeeya 3 (saddax) billood illaa 2 (labo) sano.

3. Qof kasta oo:
   a) been abuura shahaado ku saabsan xaaladda madaniga ah;
   b) adeegsada shahaado been abuur ah kuna saabsan xaaladda madaniga ah;
   c) wax ka beddela ama tirtira si loo been abuuro xogaha lagu diiwaangeliyay diiwaanada xaaladaha madaniga ah iyo qoyska; ama

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) qariba, qariya ama burburiya xogaha iyo diiwaanada xaaladaha madaniga ah iyo qoyska; waxaa uu gelayaa dambi laguna ciqaabayaa si waafaqsan Buugga 2aad, Qeybtiisa 7aad, Cutubkiisa 3aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

4. Cidkasta oo bixisa diiwaannada dad-dhigista iyo xaaladaha madaniga si aan waafaqsaneyn sharciyada dhaqan-galka ku ah waxaa galayaa dambi ciqaabtiisu tahay xabsi u dhaxeeya 10 (toban) illaa 15 (shan iyo toban) sano.

5. Qof kasta oo gacanta ku dhiga ama u hela xogaha iyo diiwaanada xaaladaha madaniga ah iyo kuwa qoyska si aan waafaqsanayn shuruucda khusaysa wuxuu galayaa dambi ciqaabtiisu tahay xabsi u dhaxeeya 10 illaa 15 sano.

## Qodobka 47aad
## Go'aannada Maamul

1. Go'aannada maamul oo ay soo saarayaan hay'adaha u xilsaaran fulinta diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah iyo qoyska waa in ay ahaadaan kuwo qoraal ah lana siiyaa cidda uu khuseeyo go'aankaasi muddo toban (10) maalin shaqo gudahood marka la gaaro.

2. Go'aannada maamul waa in ahaadaan kuwo sababaysan kuna salaysan Sharcigaan, xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo shuruucda kale ee khuseeya diiwaan- gelinta xaaladaha madaniga ah iyo qoyska.

3. Cabashada ku aaddan go'aannada maamul ee ku saabsan diiwaan-gelinta xaaladaha madaniga ah iyo qoyska ee uu gaaro Diiwaan-hayaha Dawladda Hoose waxaa cabasho looga qaadanayaa maxkamadda awoodda u leh ee heer dawlad-goboleed muddo soddon (30) maalin shaqo gudahood marka la gaarsiiyo cidda uu khuseeyo.

4. Go'aannada maamul ee Diiwaan-hayaha Guud waxaa cabasho looga qaadan karaa maxkamadda awoodda ee u leh ee heer federaal muddo 30 maalin shaqo gudahood oo ka billaabmaysa marka go'aanka maamul la gaarsiiyo cidda uu khuseeyo.

## Qodobka 48aad
## Xeer-nidaamiyeyaasha Sharcigan

Wasiirku waxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiyeyaal iyo hab-raacyo lagu fulinayo qodobbada Sharcigan marka uu la tashado Guddiga.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 49aad

## Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey sharci ama xeer kasta ee khuseeya dad-dhigista iyo tirakoobka xaaladaha madaniga ah oo ka hor imaanaya Sharcigan.

## Qodobka 50aad

## Dhaqan-gal

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.